



## Bocorka Kidfan

Xaddiga Cuntada 2 | Waqtiga diyaarinta 10 daqiiqo. | Waqtiga Guud 1 saac iyo 10 daqiiqo.

### Qalabka:

Looxa cuntada lagu jarjaro  
Saxanka foornada oo weyn  
Saxanka cunto-diiriyyaha

### Maacuunta:

Mindi Yar  
Mindi weyn  
Qaaddo  
Fargeeto  
Qaaddooyinka cuntada lagu cabbiro

### Maaddooyinka

1 xabo oo bocorka baastada laga dhigo ah  
oo weyn  
2 qaaddo oo saliid saytuun ah AMA saliid  
cadeey ah  
Cusbo iyo basbaas si dhadhan u yeelato

### Tilmaamaha

1. Kahor inta aadan hawsha bilaabin, dhaq gacmahaaga, sagxadaha, iyo cuntada.
2. Sii kululee foornada ilaa 400 darajo xaraareed.
3. Ku mud dubka bocorka baastada laga dhigo 10-12 jeer adigoo adeegsanaya mindi yar, oo afaysan.
4. Ku rid bocorka saxanka cunto-diiriyyaha ku habboon. Ku kululee kulka sarreeya ee cunto-diiriyyaha ilaa 6 daqiiqo.
5. Ka soo bixi bocorka baastada la dhigo cunto-diiriyyaha oo si taxaddar leh uga jar qaybta sare iyo hoose ee bocorka si uu si toosan ugu istaago. **Ka taxaddar: bocorka wuu kululaan doonaa.**
6. Ugu istaaji bocorka si toos ah sagxad isla siman oo si taxaddar leh u jarjar kor ilaa hoos si aad ugu kala qeybiso laba qaybood.
7. Isticmaal qaaddo si aad uga soo saarto iniinaha oo aad u tuurto. Saar laba qeybood dusha saxanka foornada, korkor ahaan u jar.
8. Ku dul daadi saliid labada qayb ee bocorka. Ku rushee cusbo iyo filfil.
9. Saar labada qayb ee bocorka ee korkor ahaan u jaran dusha saxanka foornada.
10. Dub 40-60 daqiiqo ama ilaa basasha ay ka jilidoo oo marka fargeeto lagu mudo ay galayso.
11. U oggolow bocorka inuu qaboobo ilaa 5 daqiiqo kadibna ugu mud fargeeto hoos ahaan gudaha bocorka, adigoo ka soocaya xarkaha "baastada" ah. Adigoo adeegsanaya qaaddo weyn, ku hool liilka bocorka gudaha baaquliga.
12. Ku kawtan liilka bocorka maraqa baastada ee aad ugu jeceshahay oo guro.

### Macluumaadka Nafaqada:

Kalooriyada 100  
Dufanka Guud 5g  
Cusbada 40mg  
Karbohaydaraydhka Guud 11g  
Borotiinka 1g